

Xuquuqdaada markaad kireysanaysid: Xuquuqda Aadanaha ee Alberta

Su'aalo lagaa weydiin maayo marka aad raadineyso meel aad ku noolaato

Waxyaabaha uu mulkiilaha gurigu aanu kuweydiin doonin

Qaar ka mid ah mulkiileyaasha guryaha ayaa codsan kara macluumaad aysan u baahnayn inay ogaadaan. Tani waxay noqon kartaa midabtakoor.

Kuwani waa qaar ka mid ah su'aalaha mulkiiluhu uusan ku weydiin karin:

Waa maxay Lambarkaaga Caymiska Bulshadu? Halkee baad ka heshaa lacagtaada?
Mulkiiluhu waa inaanu ku weydiin wax ku saabsan dakhligaaga. Lambarkaaga Caymiska Bulshada waxaa loo isticmaali karaa si laguugu aqoonsado sida Shaqaale Ajnabi kumeel gaar ah ama qaxoonti. Mulkiiluhu uma baahna Lambarkaaga Caymiska Bulshada si uu kaaga kireeyo.

Caruur maleedahay? Ma qorsheyneysaa inaad carruur yeelato?
Mulkiiluhu waa inaanu ku weydiisan wax ku saabsan xaaladda qoyskaaga.

Miyaad qaadataa wax daawo ah?
Mulkiiluhu waa inaanu ku weydiisan wax ku saabsan naafanimada maskaxdaada ama naafanimada jirka.

Halkee ka timid?
Mulkiiluhu waa inaanu ku weydiisan wax ku saabsan abtirsiintaada ama Goobta dhalashadaada.

Ma keli baad tahay? Ma guursatay? Ma furtay?
Mulkiiluhu waa inuunu ku weydiisan wax ku saabsan xaaladaada guurka.

Ma aadaa kaniisadda?
Mulkiiluhu waa inaanu ku weydiin wax ku saabsan diintaada.

Imisa jir ayaad tahay? Weli ma ku jirtaa dugsigu?
Mulkiiluhu waa inaanu ku weydiin wax ku saabsan da'daada.

Maxaan samayn karaa haddii mulkiiluhu i weydiisto su'aal midab takooris ah?

- Waxaad si edeb leh ugu sheegi kartaa mulkiilaha inaad dareemi doonin raaxo ka jawaabida su'aashan ama su'aashani ay tahay mid aan habboonayn.
- Waxaad sidoo kale siin kartaa macluumaadka mulkiilaha taasoo muujinaysa inaad tahay kireyste wanaagsan oo bixin kara kirada waqtigeeda.

Halkeen ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Alberta wuxuu ku siin karaa macluumaad bilaash ah oo qarsoodi ah oo ku saabsan Sharciga Xuquuqda Aadanaha ee Alberta iyo sida ay uga caawiso ilaalinta marka aad kireysanayso.

Cabashooyinku waxay ubaahanyihiin in lagu buuxiyo Ingiriisi. Waxaad caawinaad ka heli kartaa shaqaalaha dejinta ama bixiyaha adeegga bulshada. Haddii dhageysiga dacwadaada loogu talagalay cabashadaada, waxaad weydiisan kartaa Guddiga Xuquuqda Aadanaha inuu isticmaalo luqad aan ahayn Ingiriisiga ama uu isticmaalo turjumaan. Waa inaad codsataa turjumaan ka hor dhegeysigaaga.



Si aad ula xiriirto Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Alberta , shabakadan gal



Alberta
Human Rights Commission

www.albertahumanrights.ab.ca

Waxaan jeclaan lahaa inaan u mahad celino haweenka kanadiyaanka Soomaalida iyo ururka caruurta ee nala wadaagaya anaga mashruucan.



"Hagaynaya iyo wadaagaya"

Waa inaad ku tiirsanayn daabacaddaan talobixin sharciyeed. Waxay ku siinaysaa macluumaad guud oo ku saabsan sharciga Alberta oo keliya.

Daabacaaddani waxay qiraysaa maalgelinta ay bixiso Alberta ee Waxbarashada Xuquuqda Aadanaha iyo Sanduuqa maal-gelinta Dhaqamada kala duwan.



Human Rights
Education and
Multiculturalism
Fund

Centre for
Public
cplea
Legal Education
Alberta

© June 2018, Legal Resource Centre of Alberta Ltd.
Operating as: Centre for Public Legal Education Alberta

www.cplea.ca